بسم الله الرحمن الرحيم

INÍQ-TUSMAYNTA MAGACYADA EEBBE

اللهُ جل جلاله

1. Allaahu waa magac uu ku tusmeeyey Ilaah ahaantiisa koroo waa Ismullaahil'Acdam.

الرَّحْمَنُ جل جلاله

2. Rabbiga weeye makhluuq u roonoo dùnida kala reebid la'aan raxmád wéyn u fidsha.

الرَّحِيمُ جل جلاله

3. Waa Raxiimka gadáál nimcò raagtiyo khayr raalli kuu ka noqdo raaxò siiya mugweyn.

اَلْمَلِكُ جل جلاله

4. Boqor weeye makhluuq mulkiyoo dhan leh oo kèli maalintaWeyn maamulkeeda qunsha.

اَلْقُدُّوسُ عليه السلام

5. Qaaye buuxid ebyoon Kan weeyaan quwad loo qummanaan u qalmoon ceeb lahayn qabadta.

اَلسَّلَامُ عليه السلام

6. Waa Kan koonka samáán degganáán ka simoon qadderkiisa sugní sarma'seegto lahayn.

اَلْمُؤْمِنُ عليه السلام

7. Kan weeyaan martabayn mudnáán siiya weloo badbaadshoo mu'minka kan rumeeya bila.

اَلْمُهَيْمِنُ عليه السلام

8. Maariskoodiyo siin beryo deyn makalkood waa Kan mooliska uun dháb u maamuli og.

اَلْعَزِيزُ عليه السلام

9. Cissiyoo idil waa Kan qudhoo cudud loon cíd awoodi karta caabbintii la arkin.

اَلْجَبَّارُ عليه السلام

10. Waa awòòd jirta Kan xoog leh oo wax jaroo an cíd joojin kartaa qadderkiisa jirin.

11. Waa Kan aanu makhluuq méél ka shaabbihin oon lagu keenin malayn ahaantiisa mudan.

12. Alkun'uun khalqidtaan Kan weeyaan khalqiddu keli khaas u tahoo khayrka oo dhan baxsha.

13. Uumidtaan bilaw ah bawsi dheegad la'áán waa Kan beer alkuma firi béér noqodta.

14. Suuradaynta makhluuq Kan weeyaan kala muuq sannifoo mid ba qaab midabayn ka dhiga.

15. Qadaf uun galay waa Kan qudhoo caffiyoo quluubaa asturoo ceebohooda qarsha.

16. Wax kastoo qoran waa Kan qunshoo fuliyoo aan la qoormarin tuu qadderoo socodta.

17. Waa Waxsiinbadane nimco ààd u mugweyn wuxuu doono baxsha iyadoon la warsan.

18. Kan weeyaan rissiqqa siiya ruux kasta oo u roon oo naf walba rugtay joogto ku og.

19. Arrin fool adag waa Kan furdaamiya oo wax kastoo wax fura ferej oo dhan hayya.

20. Cilmiyoo idil waa Kan leh oo curshay oo cindiyoo dhan ogsoon sir cúb dheer ku jirta.

21. Kan weeyaan quwad loo qadderkiisu fuloo qofkuu doono ba uun quudintiis ka jara.

الْبَاسِطُ

22. Waa Badhaadhshaha Weyn Kan barwaaqo mugweyn raxmád baahdiyo khayr keligii bixiya.

الْخَافِضُ

23. Kan weeyaan khalqiga kaan ka khoofin qabtoo khaatir hoojiya oo sandulleyn ku khasba.

الرَّافِعُ

24. Koonka waa Rabbiga tiir la'áán ragkiboo kii rumeeya sí wéyn ugu roon mu'minka.

الْمُعِزُّ

25. Kan weeyaan martabáyn midkuu doono milgéyn miigganáán iyo xoog ku madtaansha tamár.

الْمُذِلُّ

26. Kan uu maago makhluuq waa Kan muuqdila oo dulleeyo mudhxiyoo magacbeel ku rida.

السَّمِيعُ

27. Sír kastuu yahay waa Kan og sawd baxayoo cod yar oo sanqádh ah sida wèyn u maqla.

الْبَصِيرُ

28. Wax kastoo báryar waa Kuu beyaan u yahoo dhaaye buuxa lehoo baaddinkoo dhan arka.

الْحَكَمُ

29. Xaqqa waa Kan simoo xèèrín beegíd sugoon xukunkuu fulaa xagaldaacid lahayn.

الْعَدْلُ

30. Caaddil weeye dhaboo caynsha kii dulman oo caddeeyoo xaqqa aan uga xeeban cid na.

اللَّطِيفُ

31. Kan weeyaan lur la'aan ku ladhoo khalqiga ku ladaabsha wanaag ladni aan ka go'in.

الْخَبِيرُ

32. Kan weeyaan qudha oo qabar oo dhan hayyoo qalbi oo dhan xogtii sirihii qun u og.

الْحَلِيمُ

33. Xadan waa Kan dùlweyn oo xaddhaafa lehoo u xeebtoo khalqiga ifka aan ka xadgoyn.

الْعَظِيمُ

34. Waa Kan ay cid hàddàà cayntusmayn karin oon weynaantii caqli'uun cabbirsheeg ku helin.

الْغَفُورُ

35. Waa Qaffuura-Raxiim qadafdhaaf badan oo toobadkeen qaddershoo qofka saamixi og.

الشَّكُورُ

36. Kan weeyaan shukrinnaq shacni gaara lehoo shaqo fiican gunnayn tobanlaab ku sharfa.

الْعَلِيُّ

37. Waa sarrayn iyo xoog Kan lehoon àhìdìì iltusmáyn afkashsheeg erey koobi karin.

الكبير

38. Kaammil weeye ka'weyn mid kas uun garto oo Issagoo keliyaa korrayntiisa yaqaan.

الْحَفِيظُ

39. Kan weeyaan xafidaad xannaanáyn badan oo an xaggiisa wax ba abidkood ku xumaan.

الْمُقِيتُ

40. Waa Mas'uuliyadqaad Kan makhluuqqa dhaqoo síín mugwéyn iyo dééq kadab màwl ah baxsha.

الْحَسِيبُ

41. Waa Xilqaadaha uun xaajadooda qunshoo uu makhluuqqu xurquun xaggiisuun ka helo.

الْجَبَّارُ

42. Waa Kan Weyni jirta jamaal oo dhan lehoo ahi aan jin dhinnaan joogó tiisu tahay.

الْكَرِيمُ

43. Kan weeyaan karam weyn awood kaamila loon kadabkuu bixiyaa kala joogsi lahayn.

44. Rabbi weeye ogsoon waxxa ruux falayoo Kan weeyaan rúg kasta rún aháán u arka.

45. Kan weeyaan maqla oo mid durraantay arkoo ka maarmoo khalqiga u muraadqumiya.

46. Raxmád waasac ah waa naryò wèyn Kan baxshoy wada gaadhdho makhluuq waxsiintiisa badni.

47. Kan weeyaan xikmád weyn oo xaddhaafa lehoo xukunkuu fuliyaa uu xaqiiqda yahay.

48. Waa addoommada Kan u wanaagsan dadkoo weligiisu jacayl xubbi wéyn u hayyo.

49. Milgò oo dhan wacnáán waa mudnáán Kan lehoo faxan oo sí mugwèyn wax u siiya makhluuq.

50. Waa Kan soo baxsha uun Ayaantuu ballanshoo russul baaqqa fidshoo badan soo hormarshey.

51. Waa Kan shay kasta ba shaahidoo arkayoon sha’ni uu yahay ba wax ka sheelli jirin.

52. Waa Kan xeerka dejoo xaqsooroo keligii xukunkiisu fuloo lagu caabudo xaq.

53. Uunka waa Kan qudhoo ka wakiilka ahoon ku’ xilsaartay waqqii wiiqmin aanu mar na.



54. Qudrád wèyn iyo xoog Kan weeyaan qudwád loo qaaddiroo wax fulshoon laga qaalib noqon.

55. Waa mugdhaaf Kan awood xoogga miidhan ahoo an u raadsan macuun xukun meelmarinta.

56. Kan weeyaan wada loo wax kastaa ba wadoo jecel oo sida wèyn ugu hiilsha wéli.

57. Xaal kastoo jira waa Kan qudhoo xamdinnaq xurmo oo dhan ammáán keligii xaq u leh.

58. Cilmi aad u mugweyn waa awood ma'wiya maarayntiisa ebyoon Kan ku meersha aqoon.

59. Unkid kow maamín waa Kan meelaan wax jirin alkun-mèèriska uun ka abuura makhluuq.

60. Waa Kan uunka melgoo soo celshoo mar labaad diloo geeya makhluuq minankaan la dhiman.

61. Waa mankhluuqyada Kan ku mannaysta naftoo qudhdha maanka cuddoon nolol uuma macaan.



62. Waa naf nool melgiddeed Kan qudhoo magkaloo ifka uun ka madhshoo mawdka laaya amra.

63. Waa xaqiiqada Kan xay ah soo jirey oy nololshiisu xaddhaaf xilli aanay lahayn.

64. Qun u joogidda waa quwad aan taban oon ka qadtoobin mar na qadderkuu fuliyo.

65. Wax kastuu qaddero Kan weeyaan qumiyoo qudrád weyn iyo xoog abidkii quwad leh.

الْمَاجِدُ

66. Cissi oo dhan milgeyn iyo waa martabayn Kan maqaam ba maqaam ka sarreeyo mudan.

الْوَاحِدُ

67. Kow Kan weeye qudhoo Waaxidoo keliyoon cid wuxxuu khalqay aan la wadaagti jirin.

الصَّمَدُ

68. Waa Kan kaalmò sugan siiya oo khalqigu ka sùgoon li'idii wax ba suuraggelin.

الْقَادِرُ

69. Kan weeyaan qudha oo qaaddiroo wax walba qun u oofin ogoo keligii wax qunsha.

الْمُقْتَدِرُ

70. Waa hoggaamin mugweyn iyo moolis korrayn Kan ku maamula uun miigganààn sargo'an.

الْمُقَدِّمُ

71. Kan weeyaan mayalka muddaggoynta hayyoo martabayn deddejoo mil fog soo hormarsha.

الْمُؤَخِّرُ

72. Wax markaa dhici laa waa gadaal Kan marshoo wuxxuu maago celshoo meel danbeedto dhiga.

الْأَوَّلُ

73. Waqqii waa Kan ahaa Kow Ilaahha qudhoo keliyoo jiray oo ka horreeyey ahààn.

الْآخِرُ

74. Dhammi uunka markii uu dhammeeyo makhluuq waa Kan aan dhiman oo dhab aháán u jiri.

الظَّاهِرُ

75. Waa daliil sugan Kan sida daahirka ah ka dúndheegad makhluuq loo daymassugto.

الْبَاطِنُ

76. Sida buuxda qun waa Kan ogsoon bedenkoo baaddinkuu khalqay toos beyaan looga arko.

الْوَالِي

77. Wax kastoo jira waa Kan leh oo wadartood waddaduu u garto waafajoo mariya.

الْمُتَعَالِي

78. Waa Sarreeye mudnáán mudní oo dhan leh oo ceeb ka maydhan xumoon midh dhaliila lahayn.

الْبَرُّ

79. Kan weeyaan wax baxshoo u badshoo beriyeel uunka baahitiroo aan hungèyn kan barya.

التَّوَّابُ

80. Dembi waa Kan tiroo la tuugoo la baryoo u tawàába addoon toobadkeen la yimi.

الْمُنْتَقِمُ

81. Kan weeyaan murtadka markuu doono qabtoo midka diida ciqááb malkisiiya kaggoyn.

الْعَفُوُّ

82. Kan weeyaan caffiya cid gaboodfalshay oo asturoo cindiga ceebta aan kashiffin.

الرَّؤُفُ

83. Waa Raxiim khalqiga jid u roon mariyoo denbidhaaf rissiq weyn raxmad siiya badan.

مَالِكُ الْمُلْكِ

84. Waa mùlkiilaha uun mùlkiyoo dhan leh oo maamuloo qudh ahoy tiisu meelmar tahay.

ذُو الْجَلَالِ وَالْإِكْرَامِ

85. Milgò weyni jirtoo idil waa Kan jalaal jamaal oo dhan korrayn karam joogto ah leh.

الْمُقْسِطُ

86. Waa garsoor mudan Kan wax ku moolisa oo xaqqa siiya madluum daalin uu ka marsho.

الْجَامِعُ

87. Waa Jaliilka wanaag jira oo dhan lehoo jamcin uumanka oo wada joojin mar ban.

اَلْغَنِيُّ

88. Kaaftoon waa Kan qudhoo qaniyoo dháb aháán wax qaybshoo keligii quuddarrayn la sùgo.

اَلْمُغْنِيُ

89. Waa qaniimiyo hayn Kan qudhoo bixiyoo qofka siiya adduun qani uu ku noqdo.

اَلْمَانِعُ

90. Màwle waa Kan wuxuu rabo maanaca oo ka na jooja makhluuq midkuu doono waxsiin.

اَلضَّارُّ

91. Dhibta daarta makhluuq waa Kan soo dejiyoo daannayn aan cíd kale wax ba aanay durrayn.

اَلنَّافِعُ

92. Kan weeyaan nacfi wèyn naryò buuxda baxshoo duríd nooc kasta ba cééb ka dùùn nassahan.

اَلنُّوْرُ

93. Waa Kan nuura ifkoo ku nooleeya xaqqoo hàga oo náf lunsan ku nimcaysta ilays.

اَلْهَادِيُ

94. Waa Hàdèèyaha Kan keligii wax hàguu ku hananuunsamo uun qawlka uu ku hadlo.

اَلْبَدِيْعُ

95. Waa wanaag badan Kan biligiisa ebyoon cíd tusmáyn barbardhig ku beegtooni jirin.

اَلْبَاقِيُ

96. Wax kastaa ba kolkuu baaba'oo baso waa Boqor sii jiriyoo abid baaqi aháán.

اَلْوَارِثُ

97. Kan weeyaan jira oo wiqqii sii jiriyoo waariyoo keligii wax walbaaba dhaxli.

اَلرَّشِيْدُ

98. Rabbi weeye hanuun siiya kuu la raboo ka reeboon dhadhdhansiin kaan rumayn raxmadda.

اَلصَّبُوْرُ

99. Waa dulqaad samir weyn Kan sùgààl sal lehoo sárgoyn suu u dhigay u socdaan wax walbi.

Eebbaa Mahad leh

Saalax Xaashi Carab,
Jabbuuti, 29.01.2005